

JAMHUURIYADDA  
SOMALILAND



REPUBLIC OF  
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA  
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

*Sannadka 10aad*

*Cadad Gaar ah*

*02/01/2021*

FAAFINTA RASMIGA AH EE  
SADDEX BILOOD-LAHA AH  
OCT TO DEC 2020

Email: [garyaqaankaguud@gmail.com](mailto:garyaqaankaguud@gmail.com)  
Web: [www.garyaqaankaguud.com](http://www.garyaqaankaguud.com)

*Lama iibin karo  
Not for sale*

*Sannadka 2021*



## TUSMADA CADADKA

**QAYBTA KOWAAD:** XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA QARANKA:

1. Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha, Xeer Lr. 91/2020(Cadad gaar ah)

**QAYBTA LABAAD:** XEER MADAXWEYNE:

2. Xeer Madaxweyne Dhismaha Wakaaladda Madbacadda Qaranka 4
3. Xil Ka Qaadis 10
4. Wareegto Madaxweyne Magacaabid 10
5. Xeer Madaxweyne Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha 11
6. Xil Ka Qaadis 12
7. Wareegto Madaxweyne Magacaabid 13
8. Wareegto Madaxweyne Cafis 14

**QAYBTA SADEXAAD:** XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIISOOYINKA DOORASHOYINKA & BARNAAMIYADA DAWLADA:

9. Xeer Nidaamiyaha Kabka Degmooyinka Dalka (Cadad gaar ah) Wasaaradda Arrimaha Gudaha

**QAYBTA AFRAAD:** GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:

10. Xeer Nidaamiyaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha (Cadad gaar ah) Guddida Doorashooyinka Qaranka
11. Xeer Habdhaqanka Xisbiyada Siyaasadda ee mudada diiwaangelinta codbixiyayaasha iyo Doorashooyinka Qaranka JSL (Cadad gaar ah)



**Guddida Doorashooyinka Qaranka**

**QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:**

9. SOOMA BIXIN



**QAYBTA LABAAD:**

**XEER MADAXWEYNE:**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

---

**Xafiiska Madaxweynaha**

Sum: JSL/XM/WM/249-561/102020

Taar: 15/10/2020

**Xeer Madaxweyne Lr. 08/102020**

**Dhismaha Wakaaladda Madbacadda Qaranka**

Markaan Arkey: Qodobbada 90aad iyo 113aad ee Dustuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo qodobka 63aad (3) ee Xeerka Kala Xadeynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'daha Madaxbanaan Xeer Lr.71/2015;

Markaan Arkay: Adeegga Dabacaadaha ee Wakaaladda Madbacadda Qaranku Bixisaa in uu kaalin muhiim ah ka qaato dhismaha dawladdnimada iyo hor marka dhaqaalaha;

Markaan Arkay: Muhiimadda ay leedahay in la mideeyo adeegga dabacaadaha ee hay'adaha dawladda, loona helo xarun kaliya oo xukuumadda uga



masuul noqota dabacaadaha, si loo xifdo Sirta Dawladda;

Markaan Arkay: baahida loo qabo in la qeexo xilka iyo waajibaadka Wakaaladda Madbacadda Qaranka ee dhammaan daabaacadaha Dawladda;

Markaan Sameeyay: La-tashi;

### **Waxaan Go'aamiyey:**

#### **Qodobka 1aad:**

#### **Wakaaladda Madbacadda Qaranka**

- 1) Wakaaladda Madbacadda Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland waa wakaalad dawli ah oo yeelanaysa jiritaan qaanuuni ah, isla markaana yeelanaysa astaan iyo shaanbad u gaar ah
- 2) Wakaaladda Madbacadda Qaranku si ay u gudato waajibaadkeeda, waxay yeelan kartaa hanti guurto iyo ma guurto ah, waxayna ku gali kartaa heshiis, kuna dacwaynkartaa ama lagu dacwayn karaa magaceeda.

#### **Qodobka 2aad**

#### **Madax-bannaanida Wakaladda Madbacadda Qaranka**

- 1) Wakaaladda Madbacadda Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay u madax-bannaan tahay habsami u socod-siinta hawlaheeda maamul, si waafaqsan xeerarka dalka.
- 2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn farqadda laad ee qodobkan, Wakaaladda Madbacadda Qaranku waxay



hoos tagaysaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- 3) Xil-gudashada Wakaaladda Madbacadda Qaranka Waxa saldhig u ah Dastuurka iyo Xeerarka kale ee dalka.

### **Qodobka 3aad**

#### **Ujeeddada Wakaaladda Madbacadda Qaranka**

Ujeeddada loo dhisay Wakaaladda Madbacadda Qaranka waxa kamid ah:

- 1) In la helo hay'ad dawli ah oo Qaranka uga masuul noqota dhammaan wixii loo daabacaayo Hay'adaha dawladda ee kala duwan.
- 2) In adeegga daabacaadaha ee Wakaaladda Madbacadda Qaranku noqoto mid hufan oo wax-ku-ool ah.
- 3) In la kobciyo maamulka iyo shaqada Wakaaladda Madbacadda Qaranka si loo horumaryo heerka wax-soo-saarka ee daabacaadaha Madbacadda Qaranka
- 4) In ay daboosho baahida daabacaadaha ee hay'adaha kala duwan ee Qaranka.
- 5) In la ilaaliyo, lana xafido sirta iyo qoraallada (document-ka) hay'adaha Qaranka, iyada oo laga dabacaayo Madbacadda Qaranka oo kaliya.

### **Qodobka 4aad**

#### **Waajibaadka Wakaaladda Madbacadda Qaranka Shaqooyinka Wakaaladda Madbacadda Qaranka waxa ka mid ah:**

- 1) In ay daabacdo sharciyadda ama xeererka dalka ee faafinta rasmiga ah ku soo baxa.



- 2) In ay daabacdo Waraaqaha wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda dhexe, waraaqaha maamullada Gobalada iyo Degmooyinka.
- 3) In ay dabaacdo buugaagta manhajka waxbarashada dugsiyada, buugaagta qoraalka iyo buugaagta kale ee akhriska ama isticmaalka guud.
- 4) In ay daabacdo buugaagta lacag qabashada cashuuraha ee Dawladda.
- 5) In ay bixiso adeega dabacaadaha ee ay u baahdaan muwaadiniinta iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay.
- 6) In ay daabacdo buugta dalabka iyo buugta gudoonka alaabta ee wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda.
- 7) In ay daabacdo dhammaan waraaqaha iyo buugaagta maaliyadeed ee lacag qabashada, lacag bixinta, waraaqaha dal-ku-galka (Visa), Liisamada Wadidda Gaadiidka, Buugaagta Lahaanshaha Gaadiidka, Waraaqaha Waddo Marista Gaadiidka, Tirsiga Nambarrada Gaadiidka (plate numbers), Jeegagga Dawladda IWM.
- 8) In ay qabato daabacaadaha ganacsi si lamid ah madbacadaha gaarka loo leeyahay, iyada oo ka faa'iidayasanaya suuqa xorta ah ee Jamhuuriyadda Somaliland
- 9) In ay daabacdo dhammaan daabacaadaha dawliga ah ee qaranku u baahan-yahay,
- 10) Daabacaadaha sare ku xusan, hadii ay awoodi waydo Madbacadda Qaranku waxay ka daabici kartaa meelo kale kadib marka ay hesho ogolaanshaha Madaxweynaha.



## **Qodobka 5aad**

### **Awoodaha iyo Waajibaadka Wakaaladda Madbacadda Qaranka**

#### **Awoodaha iyo Waajibaadyada Wakaaladda Madbacadda Qaranka waxa ka mid ah:**

- 1) In ay diyaariso Siyaasadda Qaranka ee lagu hormarinaayo adeegga Wakaaladda Madbacadda Qaranka.
- 2) In ay dajiso qorshaha wakaaladda isla markaana hirgaliso marka loo ansixiyo.
- 3) In ay dajiso hal-beegyada shaqada Wakaaladda, si waafaqsan qorshaha Wakaaladda.
- 4) In ay daboosho baahida daabacaadaha ee Hay'adaha Qaranka.
- 5) In ay horumariso adeegga dabaacaadaha, si uu u noqdo mid casri ah oo latartami kara madbacadda gaarka loo leeyahay.
- 6) In ay ku wacyi-galiso bulshada adeegga daabacadda ee Wakaaladda.
- 7) In ay ilaaliso xuquuqda macaamiisha iyo dhawrista sumcadda iyo danaha Qaranka.
- 8) In ay ilaaliso sirta qoraallada (document-tiyada), dawladda iyo macaamiisha.
- 9) In ay diyaariso war-bixin sannadeedka Wakaaladda una gudbisno Maxawaynaha iyo Meelaha kale ee sharciga waajibiyo.
- 10) In ay wada shaqayn dhaw iyo iskaashi la yeelato Hay'adaha Qaranka iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ay shaqo-wadaagta yihiin.
- 11) In ay kor u qaado aqoonta iyo xirfada shaqaalaha iyo hawl-wadeennada Wakaaladda Madbacadda Qaranka.
- 12) In ay hawl-galiso markii loo baahdo khuburo ay u xil-saarto hawlo mucayin ah oo looga maarmiwaayay.



13) In ay qaado talaabo kasta oo ay ku xaqeejinaysa ujeedooyinka loo abuuray, iyada oo dhawraysa xeerka.

### **Qodobka 6aad**

#### **Maamulka iyo Qaab-dhismeedka Wakaaladda**

- 1) Wakaaladda Madbacadda Qaranku waxay yeelanasaa Maareeye iyo Maareeye ku-xigeen uu magaacaabo, isla markaana uu xilka ka qaadi karo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.
- 2) Wakaaladdu waxa kale oo ay yeelanaysaa Waaxyo (departments) iyo qaybo (sections) hoostaga waaxaha.
- 3) Tirada ay noqonayaan Waaxaha iyo Qaybuhu waxa dhismahooda awood u leh Maareeyaha iyada oo loo eegaayo baahida iyo dabeecadda shaqo, si waafaqsan xeerarka dalka.
- 4) Xilalka iyo waajibaadyada Maareeyaha iyo Maareeye ku-xigeenka Wakaaladdu waxay u gudan doonaan si waafaqsan qodobbada 64aad ilaa 68aad ee Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan ee Xeer Lr.71/2015.
- 5) Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladdu waa in wixii daabacaad ah geeyaan Madbacadda Qaranka.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland**



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-562/102020

Taar: 17/10/2020

Ku: Cumar Abokor Jaamac;  
Maareeye Ku-xigeenkii hore ee Hay'adda  
Dekedaha Somaliland

Og: Maareeyaha Hay'adda Dekedaha Somaliland

**Ujeedo: Xil Ka-qaadis**

**Mudane,**

Sida aad la socoto, xilka qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darted, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad ugu haysay Qaranka.

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland**



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-564/102020

Taar: 17/10/2020

### Wareegto Madaxweyne

#### Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda  
Soomaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Ahmiyadda ay Hay'adda Dekedaha  
Somaliland u leedahay Dhismaha  
Qaranka;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-  
aragnimadiisa;

Markaan Ku Qancay: In uu Hanan karo  
Masuuliyadda ka Dhalanaysa  
Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

#### Waxaan Go'aansadey;

In Mudane, Cali Siciid Saleebaan, laga Bilaabo taariikhda  
maanta uu ahaado Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda  
Dekedaha Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland**



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/249-574/112020

Taar: 04/11/2020

### **Xeer Madaxweyne Lr. 09/112020**

#### **Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Soomaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 44aad ee Xeerka Guud ee  
Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta  
Cod-bixiyayaasha Xeer Lr. 91/2020;

Markaan Tix-geliyey: Qoraalka Komishanka  
Doorashooyinka Qaranka ee  
summaddiisu tahay  
KDQ/XK/076/2020, kuna  
taariikheysan 28/10/20;

Markaan Dersay: Soo-jeedinta Komishanka  
Doorashooyinka Qaranka ee  
Wakhtiga Qabashada  
Diiwaan-gelinta Cod-  
bixiyayaasha;

#### **Waxaan Go'aamiyey;**

In Diiwaan-gelinta Codbixiyayaasha Doorashooyinku ka bilaabanto Jamhuuriyadda Somaliland Maalinta Axadda ee taariikhdu tahay 29/11/2020.



**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

---

## **Xafiiska Madaxweynaha**

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-589/122020

Taar: 02/12/2020

Ku: Iid Maxamuud Hoori

Guddoomiye Ku-xigeenkii hore ee Gobolka Hawd

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

**Ujeedo: Xil Ka-qaadis**

Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadaba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darted, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay.

Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad haysay xilka Qaranka.

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-590/122020

Taar: 02/12/2020

### Wareegto Madaxweyne

#### Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda  
Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-  
aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo  
Masuuliyadda ka Dhalanaysa  
Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

#### Waxaan Go'aamiyey;

In laga bilaabo taariikhda maanta aan Khadar Muuse  
Axmed Heebaan u magacaabo Guddoomiye Ku-xigeenka  
Gobolka Hawd ee Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland**



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-597/122020

Taar: 09/12/2020

### Wareegto Madaxweyne

#### Cafis

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda  
Somaliland, Qodobka 90aad,  
Xubintiisa 5aad;

Markaan Arkay: Xeerka Ciqaabta Guud, Qodobkiisa  
149;

Markaan Tix-galiyey: Codsiga Waalidka iyo  
Odayaasha Maxbuuska ee ku  
taariikhaysan 25/11/2020;

Markaan Arkay: Talo-soo-jeedinta Xafiiska Xeer  
Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee  
summaddiisu tahay  
XIG/JSL/408/2020, kuna  
taariikhaysan 08/12/2020;

Markaan La-tashaday: Hay'adaha Ay Khusayso;

#### Waxaan Go'aansaday;

In laga bilaabo taariikhda maanta aan Cafis u fidiyo Cabdimannaan Yuusuf Maxamed oo ka mid ah maxaabiista xukuman, si waafaqsan Shuruucda Dalka.



**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland**